



Wargeyska ka soo baxa Grant wuxuu ku guuleystay jaa'isada Gold Crown Shantii Sanno ee isku xigay

Shantii sanno ee isku xigtay, [Wargeyska Grant](#) waxaa abbaalmarin loo siiyey jaa'isada Gold Crown oo ay siisay [Ururka Warbaahinta Iskuulada ee Columbia](#), iyaga oo tixgalinana siiyey abbaalmarinta ugu sareysa ee dugsiyada sarre dhinaca saxaafada.

Shaqaalaha Daabacaada Dugsiga Sarre oo ay la jiraan la-taliye Chris Hawking, ayaa waxa ay socdaal ku tageen Jaamacada Columbia ee ku taala New York; halkaas oo ay ku soo gudoomeen abbaalmarintaasi iyaga oo dhinaca kalena ka qeybgalay shirkii saxaafada ee Jimcaha. Abbaalmarintii sanad-dugsiyeedkii 2016-17, ugu yaraan 1,100 arday ayaa waxa ay soo saareen qoraalo lagu farsameeyey dhijital, wargeyso la soo daabacay, jariirado iyo buugta sanad-dugsiyeedka ardayda iyada oo Wargeyska Grant uu ka mid noqday 85 kii la siiyey abbaalmarinta Gold Crown.

Wargeyska Grant wuxuu ku kasbaday abbaalmarinta guud ahaan waa wargeys isku dhafan, mid ka mid lixda abbaalmarinta lagu sharfay ayaa qeyb ka ah. Abbaalmarinta Gold Crown waa jaa'isada ugu fiican marka dhinac walba laga fiiriyo wargeyska, kaasi oo xeerbeegtida kala saaraysaa tartamayaasha ay ka eegto dhinaca naqshada, sawirada, ra'yiga, waxa ay ka hadlaysa iyo qoraalkaba. Abbaalmarinta waxa ka go'aan gaara koox xeerbeegti ah oo la soo martiqaaday, qaabka ay u shaqeeyaana ay tahay kooxo yar yar, si ay dib u eegis ugu sameeyaan daabacaad kasta.